# JAMHUURIYADA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILADA

## XEERKA ILAALINTA KAYMAHA IYO DUUR-JOOGTA

(XEER Lr. 69/2015)

***December 2015***

REPUBLIC OF SOMALILAND

THE PRESIDENT

REF. JSL/M/WM/240-3775/012016 DATE 10/01/16

# XEER MADAXWEYNE NO: 0583/012016

## Dhaqan-galka Xeerka Ilaalinta Kaymaha iyo Duur Joogta Xeer Lr. 69/2015

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada Go'aan Lr. GW/G/KF-29/673/2015 ee ku taariikhaysan 21/12/2015 ee ay ku ansixiyeen Xeerka Ilaalinta Kaymaha Iyo Duur Joogta JSL Xeer Lr. 69/2015

**Wuxuu soo saaray**

Xeerkan oo lagu baahinayo Dhaqan-galka Xeerka Ilaalinta Kaymaha Iyo Duur Joogta ee Jamhuuriyadda Somaliland Xeer Lr. 69/2015.

Allaa Mahad Leh,

REPUBLIC OF SOMALILAND President

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

RECEIVED
RL.100
10/01/2016

The Republic of Somaliland
House of Representatives
Head Quarter Hargeisa.

Jamhuuriyadda Somaliland
Golaha Wakiilada
Xarunta Hargeysa.

Ref: GW/G/KF-29/673/2015 Date: 21/12/2015

**Go'aanka Ansixinta Xeerka Ilaalinta Kaymaha iyo Duur-Joogta**

**Xeer Lr. 69/2015**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:-** | **Qodobka 18aad** ee Dastuurka oo waajibiyay in dawladdu mudnaanta koowaad siiso daryeelka iyo ilaalinta degaanka, kana diyaar garawdo sida looga hortagayo aafooyinka dabiiciga ah ee ka yimaada baabi'inta degaanka. |
| **MARKUU ARKAY:-** | **Qodobka 12aad faqradda 4aad** ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland oo tilmaamaya in dawlada dhexe masuul ka tahay ilaalinta kheyraadka dabiiciga ah, kuna waajibiyay in ay qaado talaabo kasta oo haboon si looga faa'idaysto kheyraadkaas. |
| **MARKUU ARKAY:-** | Xeerka ka hortagga Xaalufka iyo Nabaad Guurka **(Xeer No. 04/98)** iyo siyaasadda Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga ee ku aadan daryeelka iyo Ilaalinta deegaanka. |
| **MARKUU YAQIINSADAY:-** | Duruufaha qalafsan ee uu ku suganyahay deegaanka Somaliland iyo baahida loo qabo in la ilaaliyo oo la soo celiyo deegaanka. |
| **MARKUU OGAADEY:-** | Hoos u dhaca ku yimi duur-joogtii wadanka iyo gabboodkoodii oo la baabiiyay. |
| **MARKUU KA DHEREGSANAADEY:-** | DABAR-GO iyo hoos u dhaca ku yimid dhirtii wadanka taas oo sababtay caro guur. |

Website: www. Somalilandparliament net

| | |
|---|---|
| **MARKUU KU RAACEY:-** | Wax ka badalkii iyo soo jeedimihii Golaha Guurtidu ku sameyay mashruuc sharciga Xeerkan. |
| **MARKUU U CODEYAY:-** | Ansixinta Xeerka Ilaalinta Kaymaha Iyo Duu-Joogta Kal-fadhiga **29aad** **Fadhigiisi 8aad** taariikhduna aheyd **07/12/2015** oo ay goob joog ahaayeen **(42)** Mudane oo ka mida ah mudanayaashia Golaha Wakiilada |

# WUXUU

Halkan kuugu soo gudbinayaa Xeerka Ilaalinta Kaymaha iyo Duur-Joogta **Xeer Lr. 69/2015S**

**ALLAA MAHAD LEH**

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JS

Baashe Maxamed Faarax
Gud Ku-xigeenka 1aad ee Golaha Wakiilada JSL.

# Golaha Wakiilada JSL.

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:-** | **Qodobka 18aad** ee Dastuurka oo waajibiyay in dawladdu mudnaanta koowaad siiso daryeelka iyo ilaalinta degaanka, kana diyaar garawdo sida looga hortagayo aafooyinka dabiiciga ah ee ka yimaada baabi'inta degaanka. |
| **MARKUU ARKAY:-** | **Qodobka 12aad faqradda 4aad** ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland oo tilmaamaya in dawlada dhexe masuul ka tahay ilaalinta kheyraadka dabiiciga ah, kuna waajibiyay in ay qaado talaabo kasta oo haboon si looga faa'idaysto kheyraadkaas. |
| **MARKUU ARKAY:-** | Xeerka ka hortagga Xaalufka iyo Nabaad Guurka **(Xeer No. 04/98)** iyo siyaasadda Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga ee ku aadan daryeelka iyo Ilaalinta deegaanka. |
| **MARKUU YAQIINSADAY:-** | Duruufaha qalafsan ee uu ku suganyahay deegaanka Somaliland iyo baahida loo qabo in la ilaaliyo oo la soo celiyo deegaanka. |
| **MARKUU OGAADEY:-** | Hoos u dhaca ku yimi duur-joogtii wadanka iyo gabboodkoodii oo la baabiiyay. |
| **MARKUU KA DHEREGSANAADEY:-** | DABAR-GO iyo hoos u dhaca ku yimid dhirtii wadanka taas oo sababtay caro guur. |
| **MARKUU U CODEEYAY:-** | Wax ka badalkii iyo soo jeedimihii Golaha Guurtidu ku sameyay mashruuc sharciga Xeerkan. |

## WUXUU SOO SAARAY XEERKAN

XEERKA ILAALINTA KAYMAHA IYO DUURJOOGTA SOMALILAND
(Xeer Lr. 69/2015)

## CUTUBKA 1AAD
## QODOBO GUUD

### Qodobka 1aad
### Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa **"Xeerka Ilaalinta Kaymaha iyo Duurjoogta"** (Xeer lr. 69/2015).

### Qodobka 2aad
### Erey bixin

Si loo fahmo macnaha guud ee Xeerkan, ereyada soo socda waxay yeelanayaan fasiraada ku hor qoran:-

| | |
|---|---|
| **Duur-joog:-** | waxaa loola jeedaa xayawaan kasta oo laf dhabar leh, ama bilaa laf-dhabar ah waxaana ku jira ugxanta iyo dhashooda, Waxa ka baxasan bini'aadamka, xoolaha la dhaqdo iyo kaluunka. |
| **Sarkaalka Awooda u leh:-** | waxa loola jeeda masuul kastoo ay Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga u igmatay ilaalinta deegaanka ilaalinta deegaanka, qof kasta oo ka tirsan Ciidanka Booliska, ciidanka ilaalada deegaanka, ilaalada badbaadinta deegaanka, seero ilaaliye, ilaalada iyagu is xilqaamay, iyo xil saartay meel marinta xeerkan. |
| **Waddo Cad/waddo dhab ah:-** | Waxaa loola jeedaa wado si cad u tilmaaman oo bulshadu isticmaasho. |
| **Carbonfuran:-** | waxaa loola jeedaa cayayaan dile halis ah oo sumeeya silsilada cuntada, waxaanu dili karaa shimbiraha waa weyn sida gorgorka, todobaddii noocba shan ayaa wadankeena ka dabar go'ay. |
| **DDT:-** | waxaa loola jeedaa sun cayayaan dile ah oo unugyada noolaha gasha oo sababi karta cudurka Kansarka, waxayna saameyn ba'an gaadhsiisaa DNA-da noolaha oo dhan. |
| **Qabasho:-** | Waxaa loola jeedaa ficil kasta oo si toos ah loogu qabanayo xayawaan, cuf, ugxaan iyo dhasha xayawaanka. |
| **Dhuxul:-** | waxaa loola jeedaa dhuxusha madaw ee ka soo hadha geedo la shiday. |

| | |
|---|---|
| **Xili xidhan/xili xidhka:-** | Waxaa loola jeeda xilli lagu nasinayo, laguna dhowrayo isticmaalka deegaan cayiman. |
| **Ka ganacsiga:-** | waxa loola jeedaa ficil kasta oo wax lagu kala badalanayo, lagu kala iibsanayo, si faa'iido looga helo. Waxaan ku jirin isticmaalka shaqsi ahaaneed (personal purposes). |
| **Dugaagga halista:-** | Waxaa loola jeedaa bahalaha nafta dadka halis ku ah |
| **Sarkaalka Kaymaha:-** | Waxaa loola jeedaa masuul ka sareeya ilaalada Kaymaha oo ka tirsan Waaxda Kaymaha ee Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga. |
| **Xaabo:-** | Waxaa loola jeedaa laamaha iyo jiridaha qalalay ee la shito. |
| **Hawl Galka Kaymaha:-** | Waxaa loola jeedaa hawl kasta oo ay fulinayso Waaxda Kaymaha ee Wasaaradda ama wakiilka waaxda si loo horumariyo oo loo hagaajiyo kaymaha. |
| **Kheyraadka Dhirta/Kaymaha ka soo go'da:-** | Waxaa loola jeeda qolofta geedaha, calafka (cawska), malmalka, fooxa, xabagta, xabagta shinida, alwaaxa, xaabada, iyo wax alla wixii ay Wasaaraddu shaaciso in ay yihiin kheyraadka dhirta. |
| **Kayn Seero ah:-** | Waaxaa loola jeedaa dhul dhireed si ku meel gaadh ah ka xanniban isticmaalka dadka iyo xoolaha. |
| **Xayawaanka la ugaadhsado:-** | Waxa loola jeedaa duurjoogta la qabsan karo, ama la dili karo si loo cuno ama loo rabbaysto oo ay ku jiraan, dhashooda iyo ugxaantoodu. |
| **Seero/Dhulxidhan:-** | Waxaa loola jeedaa dhul muddo cayiman loo xayirey/qoodeeyay/daryeelka dhirta iyo xayawaanka. |
| **Sarkaal Sare oo Seera ilaaliye ah:-** | Waxaa loola jeedaa saraakiisha ay Wasaaraddu magacowdo si ay u ilaaliyaan seerayaasha. |
| **Ruqsad:-** | Waaxaa loola jeedaa ogolaansho rasmi ah oo ay bixiso Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga. |
| **Gaadiid Mashiin Ku Socda:-** | Waxaa loola jeedaa noocyada gawaadhida, gaadiidka bada, gaadiidka cirka ee ku socda/ku shaqeeya |

| | |
|---|---|
| | shidaalka. |
| **Dhul Gaar ah:-** | Waxaa loola jeedaa dhulka lahaanshihiisa loo aqoonsan yahay cid gaar ah, isticmaalkiisa iyo intifaaciisaba |
| **Hoy:-** | Waxaa loola jeedaa nooc kasta oo hoy dad ay ku noolyihiin ah, intuu doona ha leekaado ama noocu doona ha noqdee. |
| **Waddo:-** | Waxaa loola jeedaa dhabbo ama jid ay dadweynuhu isticmaalaan oo ay ku jiraan biriishyadu (bridges). |
| **Duggaag:-** | waxa loola jeedaa xayawaanka/bahalaha fafka iyo xoolaha cuna |
| **Sarkaal Sare oo Ilaalada Kaymaha ah:-** | Waxaa loola jeedaa sarkaal ka tirsan Ilaalada Deegaanka oo ka sareeya darajada kormeere. |
| **Degaan:-** | waxaa loola jeedaa goob si joogto ah dad ugu neg yihiin. |
| **Alwaaxda Geedaha laga Sameeyo:-** | waxaa loola jeedaa geed dhacay ama la jaray oo la qaabeeyay si looga dhigo alwaax. |
| **Geed:-** | Waxaa loola jeedaa mid ka mid dhirta noocyadooda kale duwan sida dhirta dhaadheer, kuwa gaagaan, kaymaha, geedka timirta ama saliida iyo wixii la mid ah. |
| **Duur-joog:-** | Waxaa loola jeedaa nooc kasta oo xayawaan ah, shimbiraha, kaluunka wabiga, xamaaratada, oo aanay ku jirin noolaha yar yar ee dhulka. |
| **Ugaadhsi:-** | waxa loola jeedaa qabsashada, waxyeelleynta iyo dillidda duurjoogta. |
| **Wasiir ama Wasaarad:-** | waxaa loola jeedaa Wasiirka/Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga. |
| **Xeer-nidaamiye:-** | Waa hab-raac xeerkan ka dheegmaya oo digreeto ku soo saarayo wasiirka wasaaradda Deegaanku. |

## CUTUBKA 2AAD
## MAAMULKA

### Qodobka 3aad
### Hawlaha Wasaaradda

Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga ayaa masuul ka ah hirgalinta xeerkan. Wasaaradu waa in ay:-

1. Kormeer iyo tirakoob ku samayso khayraadka dhirta iyo duurjoogta.
2. Waa in ay daraasad cilmi baadhis ah ku samaysaa khayraadka dabiiciga ee dalka saddexdii sano hal mar iyadoo qoraal (report) ka diyaarinaysa. Qoraalka daraasada laga sameeyay iyo wixii ka soo baxa waa in ay baahiso wasaaraddu.
3. Waa in kor loo qaado aqoonta shaqaalaha iyo dadka kale ee u qaabilsan ama ku hawlan ilaalinta kaymaha iyo duurjoogta si ay hawlahaasi ugu gutaan si hufan sida ku qeexan xeerkan.
4. Waa in ay abaabushaa olole heer qaran ah oo ay ka qayb galayaan bulshada qaybaheeda kala duwan.
5. Waa in ay samaysaa barnaamijyo (mashaariic) ku saabsan dhiraynta oo ay ka qayb galayaan shakhsiyaad, bulsho weynta iyo ururadda danaynaya in ay beeraan geedo iyo caws.
6. Waa in ay ka warbixisaa dhirta ama duurjoogta darbar go'aysa, iyadoo wasaaraddu samaynaysa barnaamijyo iyo dadaallo lagu daryeelayo.
7. Abuurtaa oo ay maareysaa Seeroyinka.
8. Kor u qaadaa abuurista iyo maareynta kaymaha gaarka ah iyo kuwa bulshada.
9. Bixisaa ruqsaddo si loo maamulo kheyraadka dhirta si waafaqsan xeerkan.
10. Masuul ka noqotaa cilmi baadhista ku saabsan wixii badeli lahaa tamarta imika la isticmaalo oo aan deegaanka wax u dhimayn.
11. Abuurtaa tamarta lagu badalayo dhuxusha dhirta.
12. Abuurtaa ciidanka ilaalada Kaymaha iyo Duurjoogta si ay u dhaqangaliyaan (socodsiiyaan) xeerkan.
13. Iskaashi la samaysaa wasaaraddaha kale, ururadda aan dawliga ahayn (NGO's) iyo ciddii kale ee danaynaysa si kor loogu qaado aqoonta iyo qalabaynta ilaalada deegaanka iyo duurjoogta.

## Qodobka 4aad
## Gudiyada Ilaalinta Deegaanka Heer Qaran, Gobol, Degmo iyo Tuulo

1. Wasaaradda Deegaanku iyadoo la tashanaysa Gudiyada Khayraadkaa Dabiiciga ee Golaha Wakiilada, Golaha Guurtidda iyo ururadda rayidka ah ee ku hawlan arrrimaha deegaanka waxay aburaysaa Gudiga Ilaalinta Deegaanka ee Heer Qaran (GIDHQ).

2. Wasaaraddu iyadoo la kaashanaysa Maamulada gobaladdu, la tashanaysa ururadda rayidka ah, iyo waayeelka bulshada ee heer gobol waxay abuuraysaa Gudiga Ilaalinta Deeganka ee Heer Gobol (GIDHG).
[

3. Wasaaraddu iyadoo la kaashanaysa Golayaasha Deegaanka (Maamulada degmooyinka) iyagoo la tashanaya ururadda rayidka ah iyo waayeelka bulshada waxay dhisayaan Gudiga Ilaalinta Deegaanka ee Heer Degmo (GIDHD).

4. Wasaaraddu iyadoo kaashanaysa xildhibaanada golayaasha degaan iyo waxa garadka waxay dhisaysa Guddida Deegaanka ee heer Tuulo.

5. Xubnaha gudiyaddu waxa ay ka koobnaanayaan rag iyo dumar (lab iyo dhigid).

6. Xubnuhu waa in ay yihiin muwaadiniin magac ku leh bulshada dhexdeeda deegaankana ka war haya.

7. Muddo xileedka Gudiyaddu waa shan sano, mar labaadna waa la magacaabi.

## Qodobka 5aad
## Dhismaha iyo Hawlaha Gudiyadda

1. Guddida Heer Qaran waxay ka kooban tahay 10.

| | |
|---|---|
| b) Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta Reer miyiga | 2 xubnood |
| t) Guddiga Khayraadka dabiiciga ee Golaha wakiilada | Xubin |
| j) Guddiga K hayraadka dabiiciga ee Golaha Guurtida | Xubin |
| x) Wasaarada Xanaanada Xoolaha | Xubin |
| Kh) Wasaarada Beeraha | Xubin |
| d) Wasaaradda Biyaha | Xubin |
| r) Wasaaradda Tamarta &Macdanta | Xubin |
| S) Wasaaradda kalluumeysiga iyo | Xubin |
| Sh) Wasaarada Wershedaha. | Xubin |
| DH) Wasaaradda Arrimha Gudaha | Xubin |

2. Wasiirka Wasaarada Deegaanka iyo horumarinta Reer Miyiga ayaa noqonaya Gudoomiyaha Gudidda Deegaanka Heer Qaran.

3. Xubnaha waxaa soo magacaabaya Masuulka ugu sareeya Hay'adda xubin kasta ay ka socoto.

4. Wasaaradda D&HR waxay hawlgelinysaa Gudiga Deegaanka ee Heer Qaran waxay ay kala talinaysaa wasaaradda arrimaha la xidhiidha dhaqan galinta xeerkan iyo arrimaha kale ee ay wasaaraddu ka dalbato in lagala taliyo ee ay aqoonta u leeyihiin.

5. Isu-duwaha WD&HR wuxu hawlgelinaya Gudiyadda Heer Gobol ee deegaanka, guddidu waxa ay si dhaw ula shaqaynaysaa maamulka goboladda, hay'adaha sharci fulinta (law enforcement authorities) waxayna si nabad galyo ah u joojinayaan ficilada sharci darada ah ee lagu la kaco deegaanka, iyagoo u gudbinaya maamulka gobolka.

6. Wakiilada WD&HR ee heer degmo waxay shaqo gelinayaan Gudiyadda Deegaanka ee Heer Degmo waxa ay si dhaw ula shaqaynayaan golayaasha deegaanka (maamulka degmooyinka), hay'adaha sharci fulinta, booliska iyo hay'adaha kale ee aminiga.

7. Isuduwayaasha gobolada/wakiilada heer degmo ee Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyigu waxay hawlgalinayaan Gudiyadda Heer Tuulo waxa ay si dhaw ula shaqaynayaan maamulka tuulooyinka, hay'adaha sharci fulinta iyo bulshada reer miyiga.

## Qodobka 6aad
## Shirarka (Fadhiyada) Gudiyadda

1. Fadhiyada Guddiyada waxa isugu yeedhaya oo Guddoominaya Masuulka u sarreeya ee WD&HR ee qaran, gobol, deegaan ama cidda uu u igmado.

2. Guddi kasta waxa shirinaya masuulka ugu sarreeya WD&HR ee heer qaran, gobol, degmo, iyo tuulo ugu yaraan saddexdii bilood hal mar (once every quarter).

3. Gudiyadu waa in ay samaystaan nidaam (hanaan) iyo Xeer-hoosaadyo.

# CUTUBKA 3AAD
# ILAALINTA KAYMAHA, Dhirta IYO DHULKA DAAQA

## Qodobka 7aad
## Ilaalinta iyo Isticmaalka Dhirta iyo Dhul Daaqsimeedka

1. Lama goyn karo, gubi karo ama xididada looma saari karo si khaldana looma isticmaali karo dhirta Somaliland.

2. Waa mamnuuc in dhirta noocyadeeda kala duwan sida geedaha iyo cawska la baabiiyo iyadoo la goynayo si looga baayacmushtaro.

3. Waxaa la ogol yahay in dhirta, wax ka baxa dhirta, cawska iyo khayraadka kale ee dabiiciga ah looga faa'iidaysto si waafaqsan xeerkan oo aan waxba u dhimayn nolosha dhirta.

## Qodobka 8aad
## Dhul Oodan

1. Waxa reeban in si gaar ah loo oodo dhul-daaqsiimeed .
2. Looma Bixin karo Ruqsad ogolaanshiyo ah oodashada dhul-daaqsimeedka.
3. Waxa reeban in si gaar ahaaneed loo oodto dhul-daaqsineedka, dhulka kaymaha, soolka ah, qadawga, dhul cawseedka (bananka), buuraha iyo sanaagoodka.
4. Waa in labadii oodood ba oo isku xigaba uu u dhexeeyo dhul cabbirkiisu gaadhayo laba boqol oo mitter si uu fududaado dhaqdhaqaaqa dadka iyo xooluhu sida ku xusan Qodobkan faqraddiisa 1aad.
5. Wasaaraddu waa in ay la socotaa ama dabagashaa sahminta dhulka ee ay la waddo Wasaaradda Beeraha.
6. WD&HR Iyadoo la tashanaysa Gudiyada deegaanka, maamulada gobolada, degmooyinka iyo tuulooyinka waxay baabinaysaa dhulka sida sharci darada ah loo ootay, kaas oo aan waafaqsanayn qodobkan faqradiisa 1aad.
7. Lama Samayn (abuuri) karo aagag deegaan (settlements) ama tuulooyin aan waafaqsanayn siyaasada guud ee dhulka ee Somaliland.
8. WD&HR iyadoo la hawlgalinayo, guddida heer gobol iyo degmo, waxay ay ogolaansho u bixin karaan dhulka ku haboon in degaan ama meel biyood la dhigi karo iyada oo loo eegaysa siyaasada & xeerarka dalka ee isticmaalka dhulka.

# CUTUBKA 4AAD
# KAYMAHA GAARKA AH IYO KUWA BULSHADA

## Qodobka 9aad
## Dhir La Beeray

Qof kasta oo dhul sharci ah leh ee ka beera dhir, waxa uu leeyahay wixii dheef ah ee dhirta dhulkaasi ka soo baxda waxa uu dhirtaasi u isticmaali karaa sida uu doono.

## Qodobka 10aad
## Abuurida iyo Maareynta Kaymo Gaar ah iyo kuwo Guudba

1. Haddii loo arko inay haboon tahay abuurida meel lagu kobciyo dhirta si loo horumariyo beerida dhirta, maareynta kheyraadka, ka hortaga caro guurka, iyadoon dhibaato loo

gaysanayn, Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga waxa ay heshiisyo la galaysaa:-

**B)** Bulsho ama bulshooyin sharci u haysta isticmaalka dhul si loo sameeyo oo loo maareeyo kaymaha guud.

**T)** Qof ama dad badan oo sharci u haysta isticmaalka dhul si loo sameeyo oo loo maareeyo kaymaha gaarka ah.

2. Heeshiisyadda la galo si waafaqsan qodobkan faqradiisa 1aad xarafka (B) & (T) waa in ay:-

    i. Qeexaan xuduudaha kaynta.
    ii. Wakhtiga uu heshiisku shaqaynayo iyo shuruudaha heshiisku ku buri karo.
    iii. Qorshe ay ku qoranyihiin hawlaha ay tahay in uu qabto qofka ama bulshada heshiiska lala galayo si loo maareeyo Kaymaha.
    iv. Waajibaadyada kale ee qofka ama xubanaha bulshada.

3. Heshiiska galitaankiisu waxa uu dhalinayaa in dadka bulshada kawada tirsani ay wada yeelan doonaan dhirta sida dabiiciga uga soo baxa dhulkaasi.

4. Jaritaanka (goynta) dhirta ka baxa kaymaha qodobkan ku xusan looma baahna ruqsad ee waxa loo baahanyahay in lala tashado wasaaradda

5. Ilaalada waxa loogu yeedhayaa Ilaalada Deegaanka oo waxay kale yihiin ilaalo, ciidanka badbaadada ama ilaalada deegaanka.

6. Ilaalada Deegaanku waa in ay xidhaan dirays gooni ah oo astaan la aqoonsan karo ay ku qoran tahay (ku dhajisantahay)

## Qodobka 11aad
## Soo Bandhigida iyo Samaynta ilo Tamareedyo Lagu Bedalo Kuwa Haatan jira.

1. Si loo xakameeyo dabar go'a dhirta Somaliland, Wasaaraddu waa in ay daraasadayso sidii loo heli lahaa Tamar la awoodi karo oo aan deegaanka wax u dhimayn si looga maarmo (loogu badalo) dhuxusha.

2. Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyigu waa in ay u soo bandhigtaa dadweynaha tamarta lagu badalayo dhuxusha, waana in dhuxusha la mamnuuca **marka tamartaasi la helo.**

3. Wasaaraddu waa in ay burisaa (kala noqotaa) ruqsaddaha dhuxusha ee ay horey u bixisay Sanad gudihiis oo ka bilaabmaya maalinta xeerkan la ansixiyo.

4. Wasaaraddu waa in ay hogaamisaa wacyi galin qaran iyadoo dadweynaha laga wacyi galinayo baaba'a ku yimid dhirtii wadanka.

5. Goobaha gacansiga waa in ay wasaaraddu ku qasabtaa in ay dhuxusha ku badalaan tamarta aan dhuxusha ahayn.

6. Waa in gaaska iyo qalabka kale ee la xidhiidha loo sameeyaa cashuur dhaaf 100%.

7. Xeerkani waxa uu mamnuucayaa u iib geynta dhuxusha meelo ka baxasan xuduudaha Somaaliland dhoofinta dhuxusha.

8. Dawladu waa in ay abuurtaa sanduuq dhaqaale oo wax lagaga qabanayo horumarinta deegaanka iyo la dagaalanka xaalufka marka xeerkan la ansixiyo.

## CUTUBKA 5AAD
## SEERAYAASHA

### Qodobka 12aad
### Seerayaasha

1. Wasaaraddu waa in ay Sanad gudihiis ku qiimaysaa darajada seerayaasha Somaliland.

2. Wasaaradu waa in ay la soo wareegto wixii seerayaal dawladeed ahaan jiray gacanta dawladana dib ugu soo celisaa.

3. Wixii seere ah maamulkiisa wax iska leh Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta reer Miiga

### Qodobka 13aad
### Abuurida Seerayaal Cusub

1. Madaxweynaha Somaliland ayaa shaacinaya (ku dhawaaqaya) maqaamka/darajada Seerayaasha, qiimeynta wasaaradda ka dib.

2. Seerayaasha la shaaciyay waa in sanad gudihiis oo ka bilaabmaysa markii la shaaciyay, xuduudo muuqda loo sameeyaa.

3. Dadka goobahaas deggan ee xuquuq isticmaal leh, waxaa la siinayaa ruqsaddo si ay uga faa'iidaystaan dhaqaalo ahaan iyo bulsho ahaanba, waxaana mamnuuc ah waxyeelida geedaha, dhirta iyo cawska.

## Qodobka 14aad
## Noocyadda Seerayaasha iyo Kala Xadayntooda

1. Iyadoo lala tashanayo dhamaan daneeyayaasha, seerayaasha dhulka Somaliland waxaa loo kala saarayaa (qaybinayaa) sida hoos ku qoran:-

    b) Seero joogto ah (Permanent reserves) - waa seero joogta ahaan u xidhan looguna talaagalay baadhis cilmiyeed iyo dhirayn (dib u beerid) geedo dabar go'aya.
    t) Seero xilli (seasonal reserves)-seero wakhti go'an la furo, wakhti go'an la xidho sanadkii.
    j) Seero abaareed (Drought reserves) - dhul la seeray wakhti dheer oo aan la furi karin ilaa ay baahi culusi timaado ama abaaro daba dheeraaday.
    x) Seero talantaali (Rotational Reserves) - seero loo daaqo si talan taali ah oo xidhnaada muddo cayiman si uu dhulku u soo kabto.
    Kh) Seero Kaymeed (Forestry Reserves) - waa dhul xidhan oo loogu talo galay ilaalinta iyo qurxinta kaymaha dabiiciga ah sida kuwii hore u jirijiray oo ay ka mid ahaayeen Daallo, Gacanlibaax, Wagar, Libaaxlay, Nageeg IWM

2. Seerayaasha ku xusan qodobkan faqradiisa 1aad waa in ay leeyihiin xuduudo la calaamadeeyay oo muuqda oo aan lagu xadgudbi Karin.

3. Xidhida iyo furidda seerayaasha aan joogtada ahayn waxaa maamulaya sarkaalka Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga u jooga gobolka (isuduwaha wasaaradda ee degmada) isagoo la tashanaya Guddida Deegaanka ee heer degmo iyo Tuulo.

## Qodobka 15aad
## Maaraynta iyo Ilaalinta Seerayaasha

1. Qof kasta oo:-

    **(B)** Gooya, rida, qaata, guba, dhaawaca, khayraadka dhirta si uu uga ganacsado gaar ahaan dhuxusha ama

    **(T)** Urursada ama gooya cawska si uu uga ganacasado ama

    **(J)** Xagaafa, qota, beer ahaan u isticmaala iyo wixii la mid ah ama

    **(X)** Dhista, ku ganacsada isagoo aasaasaya tuulooyin ama meel la dego ama

    **(KH)** Ooda, ka qoda ceel biyood ama barkad ama

    **(D)** Ka ugaadhsada, dabin u dhiga Duur-joogta ku nool seeraha ama

    **(R)** Waxyeela, riixa, bedela, wareejiya, dhaqaajiya, faragalin ku sameeya caalamadaha seeraha ama

**(SH)** Ka sameeya wadooyin seeraha gudihiisa ama

**(DH)** Ka-ganacsada kheyraadka dhirta

2. Wuxuu mutaysanayaa ciqaabta ama ganaaxa ku xusan Qodobka 28aad faqradiisa (1aad & 2aad) ee xeerkan.

## Qodobka 16aad
## Kala Xadaynta Dhulka Daaqa iyo Dhul-beereedka

1. Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga iyadoo lala tashanayo Wasaaraddaha Xoolaha, Macdanta, Biyaha iyo Beeraha si loo dhaqaaleeyo carrada iyo loona soo celiyo daaqii waa in ay kala xadaysaa dhul-beereedka, dhulka loo cayimay xoolo dhaqatada, dhulka loo isticmaalo biyo xidheenka, sida hoos ku qoran:-

    **B)** Dhulka daaqa

    **T)** Dhulka loo isticmaalo beerida geedaha xooluhu ku naaxaan (fodder production)

    **J)** Dhulka beeraha

    **X)** Dhulka loo isticmaal biyo xidheenka, ceelal, togaga ee dhulka daaqista iyo waraabinta dhulka.

    **KH)** Dhulka loo cayimay xoolo dhaqatada

    **D)** Dhulka loo qoondeeyay biyo xidheenada (haraha iyo balayada).

    **R)** Dhulka loo qoondeeyay Cilmi-baadhista dhirta iyo xayawaanka.

2. Wasaaraddu si ay u kontorooshaa Dhulka Daaqa, Kaymaha, Duurjoogta iyo kheyraadka biyaha loogana faa'idaysto biyaha, waxay qaadeysaa talaabooyinka hoos ku qoran, iyadoo la tashanaysa Wasaaradaha Beeraha, Biyaha & Macdanta iyo Xanaadada Xoolaha:-

    **B)** Ilaalinta qararka dooxyadda, jeexjeexa ah ee ka baxsan dhulka beeraha

    **T)** Samayso mashaariic lagu joojinayo caro guurka

    **J)** Horumarinta daaqa ku yaala dhulka Somaliland, lana keeno baad cusub oo ku haboon dhulka.

    **X)** Meel lagu kobciyo geedaha, dhirta,

    **KH)** Dhiiri galinta beeralayda isticmaalka ijaarka nool si loo yareeyo khasaraha xaalufinta dhirta iyo isticmaalka ooda

    **R)** Sahaminta dhirteena iyo ururinta geedaha nafaqada iyo dawada leh (Biomedicine).

    **S)** Qaadista tiro koob xoolo dhaqato, xoolo u kala haboonista dhulka, xagga beeraha, daaqa dhirta, cilmi baadhista.

    **SH)** Dhiiri galinta iyo cilmi baarista wixii bedeli lahaa dhuxusha (alternative energy).

## Qodobka 17aad
## Abuurista Beero Hawlo Gaar ah

1. Wasaaraddu waan in ay dhiiri gelisaa abuurista beeraha u gaarka ah calafka xoolaha lagu naaxiyo (fodder crop production) iyo keydinta geedaha & cawskooda oo gundhig u noqonaya baanka calafka (fodder Bank) in lagu sameeyo meelaha kala ah:-

    **b)** Dhulka loo qoondeeyey beeraha oo kaliya (crop production only).
    **t)** Meel kasta oo dib loo soo celinayo loona barwaaqeynayo oo nabaad guurtay.

2. Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyigu iyadoo la tashanaysa Wasaaradaha Xoolaha iyo Beeraha waxa ay amri kartaa:-

    **b**) Meel lagu kobciyo geedaha (dhirta), meel loo tamashle (dalxiis) tago, oo aanay ku jirin meel macdan loo qoondeeyey ama dawladu hawl gaar ah u cayintey.
    **t)** Meel la xidhey si loo hayo sideeda oo lagu dhaqaaleeyo dabiicadda iyo cimilada, waxbarashana noqota (Biodiversity).

## CUTUBKA 6AAD
## DARYEELKA DUURJOOGTA

## Qodobka 18aad
## Ugaadhsiga

1. Ugaadhsigu waa ka mamnuuc Somaliland. Waxa mamnuuc ah qabashada, waxyeelleynta iyo dilida nooc kasta oo duurjoog ah, cidna ruqsad ugaadhsi lama siin karo.

2. Muwaadiniinta iyo Ajaanibta waxaa ka mamnuuc ah in ay ugaadhsadaan duurjoogta haddii ay tahay qabasho, toogasho, dabasho, ugxaan soo urursi, lafo, maqaar, baadad iyo qayb kasta oo xawayaanka duurjoogta ah.

3. Xeerkani waxa sidoo kale uu ciqaabayaa ama ganaaxayaa dadka kala dilaala, kuwa ka ganacsada, rugaha ururiya ee soo bandhiga duurjoogta si ay macaash uga helaan.

4. Ajaanibta doonaysa in ay booqdaan Somaliland ee ujeedadoodu tahay ugaadhsi, lama siinayo fasax dal ku gal (fiise), ruqsad ugaadhsi iyo ilaalo amni midnaba. Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyigu waa in ay kala kaashataa arrintan Waaxda Socdaalka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

5. Wasaaradda Degaanka iyo Horumarinta Reer Miyigu waa in ay abuurtaa ciidanka ama ilaalada badbaadinta duurjoogta oo dirays xidhan.

6. Muwaadinka ama muwaadiniinta ka war hela ugaadhsi ka socda meel ka mid ah wadanka waan in ay wargeliyaan xafiiska ugu dhaw ee hay'adaha ku shaqada leh. Waa in ay si nabadgelyo ah u faragaliyaan oo ay u joojiyaan ugaadhsiga inta ay imanayaan fuliyayaasha sharcigu.

7. Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyigu waa in ay u xil saartaa muwaadiniinta aqoonta u leh si ay u noqdaan Ciidan ilaaliya Duurjoogta gaar ahaan meelaha fog ee dalka.

8. Madaxweynaha Somaliland oo kaliya ayaa hadiyad ahaan u bixin kara ugu badnaan laba midh oo ah duurjoogta aan dabargo'eyn iyo kuwa dalkeena u gaarka ah (Dalkeen kaliya).

9. Goobaha iyo guryaha gaarka ah ee duurjoogta haysta waxa ay dhiiri galiyaan in dadka reer miyigu u soo ugaadhsadaan duurjoogta (shimbiraha, naaslayda & noocyada kale ee duurjoogta). Xeerkani waxa uu mamnuucayaa in duurjoogta huteelo ama guryo gaar ah lagu hayo.

10. Wasaaradu waa in ay tirakoobtaa tirada duurjoogta ku nool Huteelada (hotels) iyo guryaha gaarka ah.

11. Wasaaraddu waa in ay la wareegtaa la haanshaha duurjoogta sida goonida ah loo haysto, laakiin waxa ay joogayaan meeshooda ilaa inta loo sameynayo beer xayawaanka lagu daryeelo (zoo) intaasna wax si joogto ah ula soconaya wasaarada.

12. Waa mamnuuc in duurjoog cusub la keeno (lagu bedelo kuwii hore) goobaha huteelada iyo guryaha gaarka ah.

13. Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta reer miigu waa in ay ku diyaarisaa beerta xanaanada iyo daryeelka duurjoogta la ururiyay (Zoo) iyo kuwa la qabto ee qaxootiga ah (Wild life Refugee Camp) iyadoo la kashanaysa dawlada iyo hayadaha caalamiga ah taas oo ay gacanta ku haynayso Wasaaradu.

14. Waxaa lagu dili karaa ogolaanshaha Wasaaradda Degaanka:-

    b) Habar-dugaaggu marka uu dadka & xoolaha halis geliyo ama cuno waa la dili karaa, waxaana sababta loo dilay habar-dugaagaas iyo khasaaraha uu gaystay lagu war-gelinayaa Gudiga heer degmo.
    t) Duur-joogta halista ku ah degaanka marka cilmi-baadhis lagu caddeeyo, iyaga oo bata ama qaba cudurada la is-qaadsiiyo.
    j) Labka ama dhediga gabooba marka tiro-koob lagu sammeeyo sanad illaa Laba Sano kasta si aanay daaqa & biyaha ugu cidhiidhyin kuwa tarmaya.

15. Wasaaraddu waa in ay masuul ka noqotaa duurjoogta halista ah sida libaaxyada lagu hayo goobaha gaarka ah si bulshada looga badbaadiyo. Goobaha lagu hayo duurjoogtan

halista ah waa in ay wasaaraddu ku qanacdaa amnigooda ilaa inta la samaynayo beer duurjoogta lagu daryeelo (zoo).

## Qodobka 19aad
## Dhoofinta iyo Soo dejinta Duurjoogta

1. Duurjoog aan wadanka laga aqoon (alien species) lama soo dajin karo.

2. Lama dhoofin karo nooc kasta oo ka mid ah duurjoogta wadankeena (native species).

3. Waxa reeban in la keeno dalka dhir wax yeelo u leh degaanka iyo noolayaasha kaleba. ( Invastive Species ).

## Qodobka 20aad
## Samaynta Xarumo Cilmi Baadhiseed iyo Tarmin

1. Wasaarada D&HR waxaa waajib ku ah in ay samayso xarumo lagu tarminayo noocyada duurjoogta sida shinbiraha IWM si looga badbaadiyo dabargo ku yimaada.
2. Noocyada sida gaarka ah ugu baahan in loo sameeyo tarmin si dagdag waxa ka mida Gorayada, Juglayda, Gunburiga Libaaxa IWM.

3. Samaynta xarumaha **tarminta & Cilmi-baadhista** waa in ay gacanta ku hayso Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta reermiyiga islamarkaana ay ahaataa bee'ad ku haboon noocyada la rabo in la badiyo, qorshayaasha **maarayneed ee xarumahaas waxaa lagu fulinayaa** si **waafaqsan Qodobka 18aad ee xeerkan..**

## CUTUBKA 7AAD
## BIXINTA RUQSADDAHA

## Qodobka 21aad
## Reebanaanta bixinta ruqsadaha duurjoogta, habar-dugaagga, shimbiraha, xamaaratooyinka

1. Waa reeban (mamnuuc) tahay ugaadhsiga, ka ganacsiga, dhoofinta duurjoogta, habar-dugaagta, Shimbiraha, xamaaratooyinka ku nool, (ku dhaqan) Somaliland.

2. Waa reeban (mamnuuc) tahay bixinta ruqsad lagu oggolaanayo ugaadhsiga, ka ganacsiga, dhoofinta duurjoogta, habar-dugaagga, shimraha, xamaaratooyinka dalka ku nool (dhaqan).

3. Madaxweynaha Cid aan ahayni hadiyad uma bixin karto, cid kalena hadiyad uma siin karto, duurjoogta, habar-dugaagga, shimbiraha iyo xamaaratooyinka dalkeena.

## Qodobka 22aad
## Noocyada Ruqsaddaha

1. Noocyada ruqsadaha ay bixinayso Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga waxaay kala yihiin:-

**b) Ruqsadda Cawska**

i. Cawska loo gooyo dhoofka xoolaha ee ka yimaada goobaha sida gaarka ah loo leeyahay (Private enclosures).
ii. Ruqsadda cawska lama siin karo qofka ka ganacsada cawska ka baxa dhulka la wada leeyahay.
iii. Qofka ka ganacsada calafka xoolaha waxaa ka reeban in uu xidida ama rujiyo calafka xoolaha.
iv. Waa mamnuuc in ruqsadda cawska lala kala wareego (Transfer licence).

**t) Ruqsadda Dhuxusha**

i. Wasarada horumarinta reer miigu ma bixin karto ruqsad cusub oo ka ganacsiga dhuxusha ah laga bilaabo marka xeerkani soo baxo
ii. Ruqsadda ka ganacsiga dhuxushu ee imika jirtaa ee ka horaysay xeerku waxa uu shaqaynayaa oo kaliya **Xiliga** kala guurka ah laga bilaabo marka sharcigan la ansixiyo.
iii. Ruqsadaha ka ganacsiga dhuxushu waxay dhacaysaa marka uu dhamaado xiliga kala guurka.
iv. Qof kasta ama shirkada kasta oo haysata ruqsad ka ganacsi dhuxuleed ee mudada xiliga kala guurka ah, waxaa ka reeban in ay gooyaan ama shidaan nooc kasta oo dhirta qoyan ah marka laga reebo geedka garan-waaga ah.
v. Qof kasta ama shirkad kasta oo haysata ruqsad ka ganacsi dhuxuleed ee mudada **xiliga** kala guurka ah, waxaa reeban in si ulakac ah loo dhaawaco dhirta qoyan, taasoo ujeedadu tahay in geedku qalalo kadibna ay dhuxulaystaan.
vi. Qof kasta ama shirkada kasta oo haysata ruqsadda ka ganacsiga dhuxusha ee mudada **xiliga** ee kala guurka ah, waxaa kaliya oo ay dhuxul ka sameyn karaan xaabada qalashay oo kaliya.
vii. Ruqsada dhuxusha ee xiliga kala guurka ah lalama kala wareegi karo (transfer licence).

**j) Ruqsadda Nuuradda**

i. Qof kasta ama shirkada kasta oo haysata ruqsada ka ganacsiga nuurada, waxaa ka reeban in lagu shido dhir qoyan.

II. Lama bixin karo ruqsad ama ogolaansho inta lagu jiro wakhtiga kala guurka, wakhtigaas oo ka bilaabmaya maalinta la ansixiyo xeerkan.

**x)** Ruqsadda Ogolaanshiyaha Dhirta Guryaha Hortooda, Dhulka la Degaamaynayo & Dhirta beeraha laga Goynayo.

Kh) Ruqsadda & Astaynta Goobaha Taawaradda, Macdanta, Ciida & dhagaxa

d) Cashuuraha iyo khidmaddaha.

**i.** Cashuuraha & Khidmaddaha ruqsadaha waxa wadjir u go`aamin doona Gudi uu Wasiirka Maaliyadu ka magcaabo Wasaaraddiisa & Guddi Wasaaradda deegaanka ah.

**ii.** Cashuuraha iyo khidmaddaha ruqsadaha ku cad xeerkan waxa qeexaaya xeer-nidaamiyaha xeerkan.

## Qodobka 23aad
## Been abuur Ruqsad

1. Qof Kasta oo**:-**

**(B)** Been abuura, beddela, ama masaxa shaambad calaamadeed ama saxeexa liisanka amma sharciga ama ruqsadda lagu gooyey xeerkan ama amar kastoo lagu bixiyey ama digniin kastoo lagu bixiyey.

**(T)** Jabiya shuruudaha liisanka (ruqsadda) ama ka soo bixi waaya shuruudahaas.

**(J)** Qaadata wax kastoo ka soo go'a kheyraadka dhulka, soona ururaya si sharci daro ah oo gaadiid ku qaadata si aan xeerkan waafaqsanayn.

**(X)** Hela ama isticmaala Liisan aan si sharci ah lagu helin.

2. Waxa uu mutaysanayaa Gaanaxa iyo xadhiga ku cad Qoddobka 24aad faqradiisa 2aad Kheyraadka dhulka ka soo go'ay ee la soo qaatay, waa lala wareegayaa waana la xaraashayaa, qiimahoodana waxaa lagu wareejinayaa Qasnadda Dawladda.

3. Liisanka dambi lagu helo ama oggolansho dembi lagu helo waa lagala noqonayaa.

## Qodobka 24aad
## Ruqsad la Noqosho

1. Qofkii caado ka dhigta inuu ku xad gudbo shuruudaha ruqsadda la siiyay, ruqsadda ama ogolaanshaha uu haysto waa laga qaadayaa, alaabta kheyraadka lagu qabtay ee keentay in ruqsadda lagala noqdona waa lala wareegayaa.

2. Qof kasta ama shirkad kasta oo ku xad gudubta shuruudaha lagu bixiyey Liisanka ka ganacsiga cawska xoolaha waxaa lagala noqonayaa Ruqsadii uu haystay, waxaa la saarayaa ganaax dhan laba Malyuun illaa Sadex Malyuun (2,000,000/=SLsh) Illaa 3,000,000/=SLsh)_ ama xadhig dhan 3 bilood.

## CUTUBKA 8AAD
## XADGUDUBYADA

### Qodobka 25aad
### Awoodda Fulinta, Baadhida iyo Xidhida (Haynta)

1. Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga ayaa awood u leh fulinta xeerkan heer kasta (Qaran, Gobol, Degmo iyo Tuulo). Haddii ay suurto gal tahay, dhaqan galinta xeerkan waan in uu hoos ka soo bilawda (grass root).

2. Maamulka heer qaran waa in uu xaliyaa xad-gudubyada ku saabsan xeerkan ee maamulada heer gobol ay u soo gudbiyaan.
   i. Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyigu waa in ay xalisaa, arimaha ay maamulada heer gobol xalin kari waayeen.

3. Maamulada Heer Gobol waxa ay u xilsaaran yihiin socodsiinta (dhaqangalinta) xeerka ee gobaladooda.
   I. Isuduwaha Wasaarada iyo Wasaaradda Arimaha Gudaha (Badhasaabka & Booliska Gobolka) waxa ay dusha kala soconayaa dhaqangalinta xeerkan ee heer gobol iyagoo la shaqaynaya degmooyinkooda.
   II. Arimaha Maamulka heer gobol uu xalin kari waayo waxaa loo soo gudbinayaa Maamulka heer qaran (Hargeisa).

4. Maamulka heer degmo ayaa u qaabilsan dhaqangalinta xeerkan, waxayna ka koobanyihiin isuduwaha wasaarada ee degmada (wakiilka wasaarada), gudoomiyaha degmada, Taliyaha booliska degmada iyo waxgaradka degmada.
   I. Xad-gudyada ka dhaca degmada ee ka dhan ka ah xeerkan ee lagula kaco deegaanka ama duurjoogta, waa in xalintooda loo cuskadaa sida xeerkani uu dhigayo.
   II. Dambiyada waa weyn ee ay adagtahay in heer degmo lagu xaliyo waxaa la wareegaya xalintooda maamulada heer gobol.

5. Gudiga ilaalada deegaanka iyo duurjoogta ee heer tuulo waxa uu ka koobanyahay gudoomiyaha tuulada iyo afar xubnood, iyaga ayaa dhaqangalinaya xeerka oo indho iyo dhego u noqonaya maamulka heer degmo.
   I. Gudigu waa in uu si degdeg ah u xidhaa oo uu degmada u gudbiyaa qof kasta oo gooya dhirta, geedaha, ugaadhsada duurjoogta ku nool aagaas (tuulooyinka).

6. Waa in la dhiiri galiyaa muwaadiniinta danaynaysa ilaalinta deegaanka si ay uga qayb qaataan joojinta dhibaatada lagu hayo kheyraadka dabiiciga ah.

7. Dadka magaca ku dhex leh bulshada Somaliland ee danaynaya ilaalinta deegaanka wuxuu sharcigu u ogolyahay in ay si nabad galyo ah u joojiyaa dhibaatada loo gaysanayo deegaanka oo ay isla mar ahaantaa u gudbiyaan maamulka tuulada, degmada, gobolka ama heer qaran.

## Qodobka 26aad
## Xuquuqda Hawl-fuliyayaasha

1) Si loo dhiiri galiyo in ay dhaqan galiyaan xeerkan, hawl fuliyayaasha heer degmo waxa guno ahaan loo siinayaa 30% (boqolkiiba sodon) dakhliga ka soo baxa ganaaxa laga qaado dambiilayaasha ee degmada.

2) Alaabta kheyraadka ee la qabto waxaa lagu wareejinayaa Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga oo markaasi xaraashaysa (iibinaysa), wixii ka soo baxana ku wareejinaysa Sanduuqa Ilaalinta Deegaanka, ciddii lagala wareegayna waxay mutaysanaysaa ciqaab.

3) Dakhliga xaraashka ka soo baxa waxaa laga jarayaa 30% si loogu fuliyo hawsha ku xusan qodobkan faqradiisa 1aad.

4) Dakhliga xeerkan waxaa si deg deg ah loogu xareynayaa khasnadda sanduuqa ilaalinta deegaanka ee ugu dhaw goobta lagu qabtey dakhliga.

5) Wasaaraddu waa in ay abuurtaa ciidan ama ilaalo ugaar ah baadhista, ilaalinta iyo socodsiinta xeerkan si loo badbaadiyo deegaanka, dhulka, geedaha, duurjoogta, biyaha iyo wax alaale wixii la xidhiidha deegaanka iyo cimiladiisa.

6) Ciidankaas ama ilaaladaas waxaa loo bixinayaa ciidanka ama ilaaladda badbaadada deegaanka.

7) Ciidanka ama ilaalada deegaanka ku xusan qodobkan farqadiisa 5aad waa in ay xidhaan dirays gaar ah oo ay ka muuqato astaan la aqoonsan karo.

## Qodobka 27aad
## Xad-gudubyadda Ka-dhanka ah Duur-joogta

1. Qof kasta oo:-

**(B)**Ugaadhsada ama qaata duurjoogta shimbiro, habar-dugaagta, xamaaratooyinku ama
**(T)**Kaxaysta (gaadiid ku qaata), haysta duurjoog shimbiro, habardugaagta, xamaaratooyinku ama kaydsada qayb ka mid ah xubnaheeda, ama
**(J)** Qaata duurjoog, shimbiro, habardugaagta, xamaaratooyinka si uu ugu isticmaalo cilmi baadhis ahaan, waxbarasho ahaan ama tamashlayn (ku il-doogsi ahaan) ama
**(X)** Qaata duurjoog shimbiro, habardugaagta, xamaaratooyinka si uu u bacrimiyo.

2. Waxa uu mutaysanayaa ciqaabta iyo/ama ganaax ku xusan qodobka 28aad faqradiisa (3aad & 4aad) ee xeerkan.

## Qodobka 28aad
## Ciqaab

1. Qofka ku xad-gudba Qodobka 27aad ee Xeerkan waxa uu mutaysanayaa xadhig aan ka yarayn sanad iyo ganaax dhan ugu yaraan Saddex Malyuun **(3,000,000/=SLsh),** iyadoo loo eegayo baaxadda xad-gudubka uu ku kacay oo ciqaabtiisu la sii kordhayso.

2. Ciqaabta ama ganaaxa ku xusan Qodobkan Faqradiisa 1aad waxaa u dheer dambiilaha oo ay maxkamadu ku xukumaysaa in uu hagaajiyo dhibaatadii uu gaystay.

3. Ajaanibka ku xad-gudba Qodobka 27aad ee xeerkan waxa uu mutaysanayaa shan sano (5 sano) oo xadhig ah ama ganaax lacageed oo dhan Afartan Malyuun **(40,000,000/=SLsh),** iyadoo la eegayo culeyska kiiska iyo baaxadda xadgudubka uu sameeyey,

## Qodobka 29aad
## Hawl Fuliyayaasha

Ilaalada deegaanka ee ay Wasaaraddu u xil-saartay ilaalinta kheyraadka dhirta iyo duur-joogta waddanku waa Booliska, ilaalada ama ciidamada gaarka ah ee badbaadinta deegaanka iyo milateriga iyo ciidanka ammaanka guud ahaan.

## Qodobka 30aad
## Awooddaha Hawl-fuliyayaasha

1. Sarkaal kasta oo ka tirsan hawl fuliyayaasha waxa uu waydiin karaa qofkii uu ka shakiyo in uu tuso ruqsada ama ogolaanshaha uu haysto, isagoo aan waaran maxkamadeed aan haysan.

2. Muwaadin kasta waxa ku waajib ah inuu ku baraarujiyo, ilaalada deegaan, ciidanka boolis ee ugu dhow, ama xubnaha guddida deegaanka ee goobta uu joogo cid kasta oo ku hawllan ugaadhsi nooc kasta uu yahay.

3. Hawl fuliyayaashu waxay Awood u leeyihiin in ay:
    **(B)** Istaajiyaan (joojiyaan) oo ay baadhaan gaadiidka ay ka shakiyaan in uu si sharci daro ah uu u sido geedo (ama dhir), duurjoog, habar-dugaag, shimbiro, xamaaratooyin ama qaybo ka mid ah jidhka/xubnaha noolahaas.
    **(T)** Iyagoo waaran maxkamadeed sita in ay galaan guriga ay ka shakiyaan in si sharci daro ah loogu hayo, kaydinayo dhir, duurjoog, habar-dugaag, shimbiro, hamaaratooyin ama qaybo ka mid ah jidhka/xubnahooda.
    **(J)** In ay qabtaan geedo, duurjoog, shimbiro, gabar-dugaag, shmbiro, xamaaratooyin iyo qaybo ka mid ah jidhkooda/xubnahooda iyo qalabkii loo isticmaalay in danbiga lagu galo.

**(X)** Sarkaal ama hay'ad kasta oo ka tirsan hawl fuliyeenada oo qabta shay si waafaqsan xeerkan, waa in uu/ay rasiidh (receipt) u jaraa cidda/qofka uu ka qaaday isla markaana uu wargaliyaa Wasaaradda.

## Qodobka 31aad
## La Wareegid

Haddii qodobada xeerkan la jabiyo, maxkamaddu:

**(B)** Iyadoo eegaysa culeyska kiiska waxa ay amraysaa in lala wareego qalabkii ama gaadiidkii loo isticmaalay in lagu qaado kheyraadka dhirta, geedaha, duurjoogta ama qaybaha jidhkooda.

**(T)** Diyaradaha qaada ama lagu ogaado in ay qaaday khayraadka dhirta geedaha duurjoogta ama qaybaha jidhkooda waxay mutaysanayaan

1. Waxa la ganaaxayaa ganaax dhan Sideetan Malyuun **( 80,000,000/=SLsh )**
2. Haday cadaystaan diyradaasi qadista khayraadka dhirta geedaha, duurjoogta ama qaybaha jidhkooda waxa lagala noqonayaa ruqsada duulimadka dalka iyadoo ganaax laban lab ahna la sarayo oo noqonaya Boqol & Lixdan Malyuun **( 160,000,000/=SLsh )** oo dollarka maraykanka ah waxa la galinyaa buuga madow ee ka ganacsiga duurjoogta caalamiga ah

**(j)** Haddii eedaysanaha ama eedaysanayaasha lagu waayo dambi, maxkamadu waxa ay amraysaa in hantidii lagala wareegay loo celiyo.

**(x)** Haddii shay (qalab) la soo qabtay ay maxkamadu amarto in aan lagala wareegin qofka lagu qabtay, qalabkaa waa la haynayaa ilaa inta qofkaasi wada bixinayo ganaaxa lagu xukumay, haddii uu ganaaxa sodon (30) maalmood gudahood uu ku wada bixin waayo, qalabkaas waa la xaraashayaa si ganaaxa loogu bixiyo.

## Qodobka 32aad
## Culeyska Cadaynta

Haddii qof lagu soo oogo fal dambiyeed oo uu ku xad-gudbay xeerkan, Culeyska cadayntu (burden of proof) waxa ay saarantahay (ay tahay in ay cadayso) Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga.

## Qodobka 33aad
## Rafcaan Qaadasho

Dambiilaha ciqaabta xeerkan dhigayo lagu xukumo, wuxuu xaq u leeyahay racfaan qaadasho, haddii uu ku qanci waayo xukunka ku dhacay, waxaanu u racfaan qaadanayaa Maxkamada racfaanka ee awooda u leh.

## Qodobka 34aad
## Tir-tirid

1. Xeerkasta, xeer-nidaamiye kasta, wareegto kasta iyo amar kasta oo qodobada xeerkan dhaqangalkiisa ka horyimaadda waa la tirtiray ama waxaa loo bedelay si waafaqsan nuxurka xeerkan

2. Heshiis kasta oo ka hor-imanaya Xeerkan waa la-laaley.

## Qodobka 35aad
## Ogolaanshaha Heshiisyada Caalmiga ah

Jamhuuriyada Somaliland waxay tixgalinaysaa heshiisyada caalamiga ah ee ku saabsan Ilaalinta dhirta iyo Duurjoogta oo ay ugu horayso shantan heshiis ee lifaaqa ku ah xeerkan

## Qodobka 36aad
## Dhaqangal

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa marka Golayaasha Xeer-dejintu ansixiyaan, Madaxweynuhuna saxiixo, faafinta rasmiga ahna lagu soo saaro.

## References


1. Somalia Fauna and Forest Conservation (Law No.15/1969)
2. Somaliland Law on the Prevention of Deforestation & Desertification (Law No. 04/98)
3. Eritrea Forest and Wild Proclamation Act
4. MoERD Budget 2014

## (Annex 1): Heshiisyada Caalamiga ah

Jamhuuriyadda Somaliland waxa ay ku dadaali doontaa sidii ay qayb uga noqon lahayd heshiisyada muhiimka ah ee Caalamka ee ku saabsan ilaalinta duurjoogta iyo dhirta. Shantan heshiis ee hoos ku qoran ayaa ugu muhiimsan:

1. Heshiiska Caalamiga ah ee Ka Ganacsiga Dhirta iyo Duurjoogta Dabar go'a halista ugu jira (waxaa loo soo gaabiyaa CITES)

CITES waa heshiiska ugu caansan heer caalami eeku saabsan ilaalinta dabiicigaa (nature). Waxa uu mamnuucayaa ka ganacsiga duurjoogta iyo dhirta halista ugu jirta in ay dabargo'aan.

Heshiiskani saddex qaybood ayuu u kala saarayaa dhirta (flora) iyo dubatada (fauna):

B. **Lifaaqa 1 (Appendix 1)** waxa uu kontorolayaa ka ganacsiga duurjoogta, dhirta iyo qaybaheeda, waana mamnuuc ka ganacsigoodu haddii aan ogolaansho laga haysan wadamada laga qaadayo iyo wadamada loo dhoofinayo labadaba. Maroodiga iyo noocyada kaymaha Afrika ayaa qaybtan soo hoos galaya. Mar xalada Somaliland haddii aan eegno, waxaa qaybtan hoos imanaya noocyada naaslayda sida Cawsha, Dibtaag. Shimbiraha qaybtan waxaa ka mid ah Wersengeli Linnet, Little Brown and Hueglin's Bustard, Golden-Winged Grosbeakiyo Cabeebka (Somali Thrush). Somaliland waxa ay diyaar u tahay in ay saxeexdo heshiiska muhiimka ah.

T. **Lifaaqa 2 (Appendix 2)** waxa qaybtani ay ka hadlaysaa duurjoogta iyo dhirta aan wakhtigan haatan la joogo dabargo' halis ugu jirin ee laakiin mustabalka dabargo'i kara, ka ganacsigooduna u baahanyahay ruqsad dalka laga qaadayo iyo dalka loo dhoofinayo labadaba.Lifaaqan (qaybtan) waxaa hoos iman kara Haramacadka, Diinka, Desert Wart Hog iyo Kori Bustard.

J. **Lifaaqa 3 (Appendix 3)** waxa uu ku saabsanyahay heshiisyo ay wadamada qaarkood wada galeen si ay u xakameeyaan ka ganacsiga dhirta, duurjoogta iyo qaybahooda. Wadama Namibiya iyo Thailand waxa ay ku heshiiyeen in xakameeyaan ka ganacsiga haramacadka Afrika.

Somaliland waxa ay ku dadaali sidii ay heshiisyo ula gali lahayd wadamada Carabta si loo mamnuuco ka ganacsida Cawsha, Dib-taaga iyo Gorayada (Bustards).

2. **Heshiiska Palermo**

Heshiiskani waxa uu ku saabsanyahay joojinta dambiyada iyo ka ganacsiga caalamiga ah ee dhirta iyo duurjoogta iyo qaybahooda. Somaliland waxa ay danaynaysaa in ay qayb ka noqoto heeshiiska marka la eego ka ganacsiga sharci darada ah ee lagu hayo duurjoogta dalka ee loo qaado wadamada Carabta iyo meelo kale ba. Caramacadka, Biciidka ayaa laga si sharci daro ah looga dhoofiyaa magaalooyinka iyo tuulooyinka xeebaha.

### 3. Heshiiska Noolaha Kala Duwan (Biological Diversity)

Heshiiskani waxa uu ku saabsanyahay ilaalinta Deegaanka guud ahaantii si looga hortago nabaad guurka iyo waxyeelaynta kaymaha, biyo xidheenada/haraha/barkadaha iyo dhulka goyan. Somaliland waxa ay diyaar u tahay in ay qayb ka noqoto heshiiskan. Waxaa la aasaasay sanadkii 1994 shirkii Rio De Jannero ee 1992 ka dib.

### 4. Heshiiska Qaramada Midoobay ee ka Hortaga Xaalufka

Waxa uu ka soo bilawday shirkii taariikhiga ahaa ee Rio Summit ee 1992 kii. Heshiiskani waxa uu ku saabsanyahay dhulalka lama dagaanka ah ee adduunka. Waxaa mararka qaar loo yaqaan "Heshiiska Dhulka Qalalan" kaas oo loogu talogalay wax ka qabadka iyo maareynta caafimaadka noolaha dhulkaasi ee ay dhibaatadu ka soo gaadhay isticmaalka xad-dhaafka ah iyo isbedalka cimilada loona yarayn lahaa xaalufkaiyo baaba'a noolaha kala duwan. Waxa heshiiskan wacyi gelinta caalamiga ah dhigaya ay faa'iido weyni ugu jirta qaaradda Afrika gaar ahaan wadamada Sahara (Saxaraha) ka hooseeya ilaa wadamada geeska Afrika. Somaliland waa in ay heshiiskan qeyb ka noqoto iyadoo u sii maraysa Barnaamijka urur goboleedka (Sub-regional National Action Programs). 22 bisha May sanad kasta waxaa adduunweynaha laga sameeyaa wacyi gelin (International Day for Biodiversity).

### 5. Heshiiska Qaramada Midoobay ee Isbedelka Cimilada (Climate Change)

Heshiiskan u jeedadiisu waa sidii loo yarayn lahaa walxaha hawada lagu sii daynayo ee isbedelka Cimilada sababta u ah. Walxahaas waxaa ka mid ah sida Karbon-laba Oxide (Carbondioxide) ama Gaasas kale, waxayna ka dhashaan isticmaalka shidaalka iyo shidida dhuxul dhagaxa. Heshiiska waxa uu diiradda saarayaa wadamada horey u maray (developed and fast developing economies) maadaama ay yihiin kuwa qaybta weyn ka qaata isbedelka Cimilada. Afrika oo ay Somaliland ku jirto, wax saamayn la taaban karo kuma laha isbedelka Cimilada. Laakiin dhuxusha iyo geedaha la shidayo waxa ay qayb ka yihiin isbedelka Cimilada.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL**

______________________________

**Baashe Maxamed Faarax**
**Ku-simaha Gudoomiyaha ahna Gudoomiye**
**Ku-xigeenka 1aad ee Golaha Wakiilada JSL**

______________________________